**MAXKAMADDA SARE EE DEGMADA THURSTON**

*Liang, et al. v. State of Washington Dep't of Social & Health Services (DSHS), et al.*

**Haddii aad tahay ama aad ahayd Adeeg-bixiye Shakhsi ah (IP) oo daryeel shakhsiyeed u fidiyey daryeel shakhsiyeed macaamiil saacadahooda daryeelka ee lactooda la bixiyay ay yareysay waaxda DSHS taas oo sabab u ah xeerarka "dheefta la wadaago", waxaad lacag-bixin ka heli kartaa maslaxo dacwadeed uu qof ama koox ay maxkamad geeyeen iyagoo ku hadlaya afkooda iyo afka ciddii kale ee ay khuseyso.**

***Maxkamad ayaa oggolaatey ogeysiiskan. Kani ma ahan weyddiisasho ka timid qareen.***

Maslaxada waxay bixin doontaa $116 milyan oo lagu bixinayo xaq-sheegashooyinka Aeeg Bixiyeyaasha Shakhsiga ah (IPs) kuwaas oo daryeel shakhsiyeed u fidiyey macaamiisha saacadahooda daryeelka ee lacagta lagu bixiyo ay yareysay waaxda DSHS taas oo sabab u ah xeerarka "dheefta la wadaago" ee DSHS inta u dhaxeyso 7-da Maarso, 2014 iyo 28-ka Febraayo, 2021.

Maslaxadu waxay xallin doontaa dacwadda ku saabsan haddii IPs-yada loo diidey dhammaan magdhowga saacadaha ay shaqeeyeen iyadoo sabab u ah xeerarka dheefta la wadaago; uu lacago siiyo IPs; ka fogaado halisaha sii wadista dacwadda; lacago siiyo IPs-yada adiga oo kale ah; oo ka siidaayo/qaado DSHS iyo eedaysanayaasha kale mas'uuliyadda.

Xuquuqahaaga sharciga ah ayaa waxaa saameeya haddii aad tallaabo qaado ama haddii aadan qaadin. Si taxaddar leh ogeysiiskan u akhri. Macluumaad dheeraad ah ayaa waxaa laga heli karaa www.IPWageSettlement.com.

**XUQUUQDAADA SHARCIGA AH IYO IKHTIYAARADA MASLAXADA**

| | |
|---|---|
| **Waxba Ha Sameynin oo, haddii aad jeeg hesho, lacageyso** | **Ku sii jir dacwaddan. Ka tanaasul xuquuqaha qaarkood.**<br>Adiga oo aanan waxba sameyn, ayaa waxaad ku sii jireysaa dacwadda. Haddii maslaxada la oggolaado oo aadna saami ka hesho, waxaad heli doontaa jeeg. Eeg Qaybaha 9-13. Haddii aad lacageysato ama aad banki ku shubato jeegga, waxaad xaqiijineysaa in aad u shaqeysay macmiil ay arrintu taabatey, in aad macmiilka u fidisey qaddar cayiman oo daryeel ah, iyo in aadan qaadan lacagta adeegyadaasi. Xaqiijintan waxaa lagu faahfaahiyey Qaybta 13aad ee hoose. Haddii aadan lacageysan jeegga, qaddarka waxaa dib loogu qaybin doonnaa IPs-yada kale laakiinse waxaad weli iska dhaafeysaa xaqa aad u leedahay in aad ku dacweyso DSHS qaansheegyada ay maslaxadu caymiso. |
| **Naftaada Ka-reeb** | **Ka bax dacwaddan. Wax dheefo ah haka qaadan. Ilaali xuquuqaha.**<br>Haddii aad naftaada ka reebto ama "ka baxdo" maslaxadan, ma heli doontid lacag-bixinta maslaxada. Laakiinse, waxaad yeellan doontaa xuquuqo kasta ee laga yaabo in aad leedahay si aad gooni ahaan ugu raadsato xaq-sheegashooyin kasta ee ka dhan ah DSHS. Si aad uga baxda, waa in aad tallaabo qaadaa marka ay taariikhdu tahay 22-ka Luulyo, 2022. |
| **Diid** | **Maxkamadda u sheeg haddii aadan jeclayn maslaxada.**<br>Haddii aadan ku qancin shuruudaha maslaxada la soo jeediyay, waxaad u soo gudbin kartaa diidmo qoraal ah Maxkamadda iyo/ama waxaad imaan kartaa Maxkamadda si aad sharraxaad uga bixiso diidmadaada. Adiga kama bixi kartid mana diidi kartid maslaxada. |

- Xuquuqahaaga iyo ikhtiyaaradaada – iyo taariikhaha kama dambeyska ah ee la adeegsanayo – ayaa waxaa lagu sharxay ogeysiiskan.
- Maxkamadda ayaa welo go'aamineysa haddii ay oggolaanayso maslaxada iyo haddii kale. Lacag-bixinnada ayaa la sameyn doonnaa haddii Maxkamaddu ay oggolaato maslaxada iyo ka-dib marka rafcaannada la xalliyo. Fadlan dulqaad yeelo.

**www.IPWageSettlement.com. تتوفر نسخة من هذا الإشعار باللغة العربية على الموقع الإلكتروني**
یک نسخه از این اطلاعیه به زبان فارسی در www.IPWageSettlement.com. موجود است.
**□□ □□□□□ □□ □□□□□□ □□□□□□ www.IPWageSettlement.com.'□□ □□□□□ □□□ ·**
**Версия этого Уведомления на русском языке доступна на www.IPWageSettlement.com. ·**
**Nuqulka Ogeysiiskan oo Af-Soomaali ah ayaa laga heli karaa www.IPWageSettlement.com. ·**
KMENCa PasaExµr ´nesckðICUndMNwgenH KW/acrk◊nenA
**www.IPWageSettlement.com. · Una versión en español de este aviso está disponible en www.IPWageSettlement.com. · Версія цього Повідомлення доступна українською тут www.IPWageSettlement.com.. · Một phiên bản của Thông Báo này hiện có bằng Tiếng Việt tại www.IPWageSettlement.com. · 此通知函的中文版位于www.IPWageSettlement.com.。 · 이 알림 버전은www.IPWageSettlement.com 에서한국어로 이용가능합니다. · □□ ਨੋਟਿ ਸ □□ □□□□□□ ਅਨੁਵਾਦ www.IPWageSettlement.com. '□□ □□□□□ □□□**

## MACLUUMAADKA AASAASIGA AH

### 1. Maxay tahay sababta aan u helay ogeysiiskan?

Sababta aad ogeysiiskan u heshay waxay tahay in diiwaannada Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) ee Washington ay muujinayaan in aad tahay ama aad ahayd Bixiye Shakhsi ah (IP) oo ay qandaraas la gashey waaxda DSHS waqti u dhaxeeya 7-da Maarso, 2014, iyo 28-ka Febraayo, 2021, si aad adeegyada daryeelka shakhsiyeed ugu fidiso macmiil saacadahiisa daryeelka ee la bixiyay la yareeyay iyadoo sabab u ah in DSHS y ku summadeysay xaaladda macmiilka ee qiimeynta CARE sida "dheefta la wadaago" ee ugu yaraan hal hawl.

Maxkamaddu waxay amartey in ogeysiiskan laguu soo diro iyadoo sabab u ah in aad xaq u leedahay in aad wax ka oggaato maslaxada la soo jeediyay iyo xuquuqahaaga sharci iyo ikhtiyaarada ka hor inta aysan Maxkamaddu go'aamin haddii maslaxada la ansaxinayo iyo haddii kale. Dacwadda waxaa loo yaqaannaa *Liang, et al. v. State of Washington, et al.*, Lr. 20-2-02506-34; waxayna ka socotaa Maxkamadda Sare ee Washington ee Degmada Thurston; waxaanna keenay IPs-yada qaar (oo ogeysiiskan loogugu yeerayo "Dacwoodayaal") oo ka soo horjeeda Gobolka Washington, DSHS, iyo Xoghayaha DSHS (oo ogeysiiskan wadajirkooda loogugu yeerayo "DSHS").

### 2. Dacwaddan maxay ku saabsan tahay?

Dacwoodayaasha waxay ku dacwoonayaan in laga bilaabo 7-da Maarso, 2014, ilaa 28-ka Febraayo, 2021, DSHS in aysan IPs-yada qaar siinin dhammaan ujuurooyinkii ay ku lahaayeen. Dacwoodayaashu waxay sheegeen in ay tani dhacdey markii DSHS ay yareysay saacadaha daryeelka lacagta lagu qaato iyadoo sabab u ah in ay oggaatey in IP-ga iyo macmiilka, ama macaamiil badan oo isku guri ka tirsan, in ay wadaageen dheefta hawlaha daryeelka shakhsiyeed qaarkood ee uu qabtey IP-ga, sida cunto karinta, dukaameysiga, shaqada guriga, ama keenista alwaaxa. Dacwaddu waxay raadinaysaa dib u bixinta mushaarka iyo khasaaraha lacageed kale ee waafaqsan qandaraaska dowladda iyo sharciga ujuurooyinka ee shaqada Dacwoodayaasha ay sheeganayaan in IPs-yada ay ka shaqeeyaan mushaar la'aan.

DSHS waxay diiday in ay ku xadgudubtey wax sharciyo ah amaba in ay sameysay wax khalad ah.

### 3. Maxay tahay maslaxo dacwadeed uu qof ama koox ay maxkamad geeyeen iyagoo ku hadlaya afkooda iyo afka ciddii kale ee ay khuseyso?

Dacwadda uu qof ama koox ay maxkamadda geyso waa nooc ka mid ah dacwadaha taasoo dacwoodayaasha la sheegay ay u dacwoonayaan nafsadooda iyo sidoo kale dadka kale ee ay isku xaaladda ku sugan yihiin. Kiiskan, Dacwoodayaasha waa saddex IPs-yo, Sylvia Liang, Manuel Brito, iyo Shazia Anwar. IPs-yada kale waxaa loo yaqaannaa "xubnaha dacwadda." Dacwadda, hal maxkamad ayaa xallinaysa arrimaha dhammaan xubnaha dacwadda, marka laga reebo kuwa nafsad ahaantooda iska reeba dacwadda.

Maxkamadda waxay u aqoonsatey kiiskan in uu yahay dacwad loogu talagalay ujeeddooyinka maslaxada la soo jeediyey. Maxkamaddu ma go'aamin haddii kiiskan ay tahay in loo aqoonsado dacwad loogu talagalay ujeeddooyinka go'aaminta mudnaanaha sheegashooyinka Dacwoodayaasha. Haddii Maxkamaddu aysan oggolaan ansaxinta kama dambeysta ah ee maslaxada sabab kastaba ha noqotee, ma jiri doonno heshiis maslaxo ah oo dhinacyadu waxay dib ugu noqon doonnaan dacweynta ama sii wadista dacwadda kiiska. IPs-yada ay khuseyso maslaxada waxaa loo yaqaannaa "Xubnaha Maslaxada Dacwadda," marka laga reebo kuwa nafsad ahaantooda iska reeba maslaxada dacwadda.

### 4. Maxay tahay sababta ay maslaxo u jirto?

Labada dhinacba waxay aaminsan yihiin in ay maxkamadda ku guuleysan doonnaan, laakiin maxkamaddu xukun ma gaarin iyadoo u daneynaysa dhinacyada midkood. Labada dhinacba waxay wada oggolaadeen maslaxo si looga fogaado kharashaadyada, dib-u-dhacyada, halisaha, iyo hubid la'aanta lala xiriirinayo qaadista dacwadaha iyo rafcaannada. Waxay sidaa sameeyeen ka-dib baaritaan qoto-dheer iyo macluumaad isdhaafsi. Xubnaha Dacwadda Maslaxada ee xaqa u leh xisaabinta lagu qeexay Qaybta 10aad ee hoose waxay helayaan magdhow.

Dacwoodayaasha iyo qareennadooda (Qareenka Dacwadda) waxay u maleynayaan in maslaxadu ay ku jirto danaha ugu wanaagsan ee dhammaan Xubnaha Maslaxada iyo in shuruudaha maslaxadu ay yihiin kuwo cadaalad ah, macquul ah, oo dad ku filan.

## KUMAA KU JIRA MASLAXADA?

### 5. Kumaa qayb ka ah dacwadda maslaxada?

Dacwadda maslaxada waxaa lagu qeexay sidan: "dhammaan IPs-yada hadda iyo kuwii hore ee qandaraaska la galey DSHS si ay u bixiyaan adeegyada daryeelka shakhsiyeed ee macmiilka saacadahiisa daryeelka guriga gudahiisa la yareeyay iyadoo sabab u ah in DSHS, oo wakiiladeeda loo marayo, in ay ugu summadeysay macluumadka qiimeynta DARYEELKA in uu leeyahay Xaaladda 'dheefta la wadaago' iyadoo la eegayo hal ama in ka badan oo ah IADLs."

### 6. Miyaan qayb ka ahay dacwadda maslaxada?

Haa, haddii aad iska reebto naftaada adiga oo ka baxaya mooyaane (eeg Qaybaha 15–16). Sababta aad u helayso ogeysiiskan waa in diiwaannada DSHS ay muujinayaan in aad ugu yaraan u shaqeysay hal macmiil kaas oo saacadahiisa daryeelka idman la yareeyay intii lagu guda jirey Muddada Dacwadda sababta oo ah DSHS waxay ku summadeysay "xaaladda" macmiilka ee qiimeynta DARYEELKA sidda "dheefta la wadaago" ugu yaraan hal hawl oo daryeel shakhsiyeed ah.

### 7. Ka waran haddii aanan ogeysiiska si toos ah u helin, laakiinse aan u maleeyo in aan ahay xubin ka tirsan dacwadda maslaxada?

Haddii aadan si toos ah u helin ogeysiiskan laakiinse aad u maleynayso in aad u shaqeysay macmiilka DSHS kaas oo saacadahiisa daryeelka shakhsiyeed ee idman la yareeyay intii lagu guda jirey Muddada Dacwadda iyadoo sabab u ah in DSHS ay ku qiimeysay in macmiilku uu lahaa "dheefta la wadaago", fadlan kala xiriir maamulaha dacwadda 888-964-0102.

## DHEEFAHA MASLAXADA—WAXA AAD HELAYSO

### 8. Maslaxadu maxay bixinaysaa?

DSHS waxay oggolaatey in ay bixiso lacag dhan $116,068,000, taas oo loo adeegsan doonno in lagu bixiyo lacag-bixinnada la siinayo Xubnaha Dacwadda Maslaxada, DSHS iyo IPs-yada waxay wadaagayaan canshuuraha mushaaraadka, kharashka iyo ujuurrooyinka qareennada Dacwadada, kharashka maamulka maslaxada iyo ogeysiiska, iyo, haddii ay ku habboon tahay, lacagaha khidmadaha ururka shaqaalaha.

### 9. Immisa ayay noqoneysaa lacag-bixinteyda?

Lacag-bixintaada la qiyaasey waa [FILL IN]. Sida dhammaan Xubnaha Dacwadda Maslaxada, lacag-bixintaada gaarka ah waa saamigalka saamiga maslaxada oo ku saleysan tirada saacadaha Dacwoodayaasha ay sheeganayaan in aad mushaar la'aan shaqeysay inta lagu guda jiro Muddada Dacwadda iyo qiimaha mushaarka ku habboon saacadahaasi.

### 10. Sidee loo xisaabiyey lacag-bixinteyda?

Dhinacyadu waxay ku heshiiyeen hab lagu xisaabinayo lacag-bixinnada Xubin kasta oo ka tirsan Dacwadda Maslaxada, shakhsi ahaan, iyadoo lagu saleynayo xogta ku jirta diiwaannada DSHS. Xogtu waxay muujineysaa macaamiisha DSHS qiimeysay in ay leeyihiin "dheefta la wadaago," IPs-yada daryeelka u fidiyey macaamiishaasi, inta saacadood ee la oggolaadey ee la yareeyay oo aan lacagtooda la bixin iyadoo sabab u ah summadeynta xaaladda "dheefta la wadaago", adeeg-bixiyeyaasha lacagta la siiyey ee loo qoondeeyay hawlaha "dheefta la wadaago", iyo inta Dowladdu siisey adeeg bixiyeyaashaasi.

Saamigaaga la qiyaasey ee maslaxada ayaa waxaa la xisaabiyay iyadoo loo qaybinayo lacagta la qiyaasey in laguu soo celinayo wadarta guud ee lacagaha loo celinayo dhammaan Xubnaha Dacwadda Maslaxada, iyadoo ka-dibna qaddarkaasi lagu dhufanayo $105 milyan. $105 milyan waa wadarta guud ee maaliyadda maslaxada oo laga jarey qaddarrada la hayo si loogu bixiyo saamiga DSHS ee canshuuraha msuhaaraadka, kharashka iyo ujuurrooyinka qareenka Dacwadda, maamulka maslaxada iyo kharashka ogeysiiska dacwadda, iyo kharashka

kale. Lacagaha dib loo bixinayo ee loogu talagalay xisaabintan waa tirada saacadaha aan lacagtooda la bixin ee sababta u ah “dheefta la wadaago” marka lagu dhufto qiimaha mushaarka lagu dabakhi karo (oo ku jiro waqtiga dheeraadka ah, halka ku habboon), iyadoo aanan la labalaabin khasaaraha ama dulsaarka. Haddii adeeg-bixiyeyaal u khidmeeya isla hal macmiil ay taabato “dheefta la wadaago” isla hal bil, saacadaha aan lacagahooda la bixin ayaa si saamigal ah loogu qaybin doonnaa.

Haddii xubnaha kale ee dacwadda aysan lacageysan jeeggagooda ama kharashka kale ee maslaxadu uu ka yar yahay inta la qiyaasey, waxaad heli kartaa ilaa laba lacag-bixinno oo dheeraad ah oo noqon doonna saamigaaga saamigalka ah ee inta ka harsan guud ahaan maaliyadda maslaxada, oo lagu darey dulsaarka ku soo kordhay maaliyadda.

### 11. Maxay tahay sababta lacag-bixinteyda la qiyaasey ay uga badan tahay ama uga yar tahay lacag-bixinta qof kale?

Maaliyadda maslaxada ayaa waxaa loo qoondeeyay Xubnaha Dacwadda Maslaxada iyadoo lagu saleynayo saamigalka boqolleyda maaliyadda, iyadoo la tixgelinayo khasaaraha shakhsiyed ee la qiyaasey ee IP kasta sida qayb ka mid ah khasaaraha guud. Qaddarada maslaxada shakhsiga way kala duwanaan doonnaan iyadoo lagu saleynayo arrimaha sida muddada waqtiga IP-ga uu shaqeeyay inta u dhaxeysa 7-da Maarso, 2014, iyo 28-ka Febraayo, 2021, tirada saacadaha daryeelka laga soo yareeyay saacadaha la oggolaadey ee sababta u ah "dheefta la wadaago" (taas oo aad u kala duwanaan karta oo ku xiran saacadaha daryeelka guud ee macmiilka iyo inta "dheefta la wadaago" ee ay DSHS go'aamisey in ay jireen), qiimaha ujuurrada IP, iyo haddii qiimahaasha waqtiga dheeraadka ah lagu dabakhi karo.

### 12. Maxay tahay sababta looga yaabo in uu eber noqdo saamigeyga la qiyaasey?

Waxaa laga yaabaa in aad noqoto Xubin Ka Tirsan Dacwadda Maslaxada laakiinse aadan wax lacag ah ku lahayn haddii diiwaannada DSHS ay muujinayaan in adeeg-bixiyeyaal kale, oo aan adiga ahayn, in loo qoondeeyay hawlaha "dheefta la wadaago" ee qorshaha daryeelka macmiilka, haddii DSHS aysan dooran "dheefta la wadaago" sida "xaaladda" macmiilka, ama haddii DSHS ay qiimeysay dheefta la wadaago oo ka baxsan Muddada Dacwadda.

### 13. Waa maxay shuruudaha kale ee muhiimka ah ee maslaxada?

**Xaqiijin**: Marka aad lacageysato ama banki ku shubato lacag-bixintaada maslaxada, waxaad xaqiijineysaa in:

1. Aad tahay ama ahayd IP-ga macmiil oggolaanshaha adeegyada daryeelkiisa shakhsiyeed ee guriga ee bilaha ah la yareeyay iyadoo sabab u ah "dheefaha la wadaago" ee aad bixisay;
2. Waxaad bixisay adeegyada daryeelka shakhsiyeed ee guriga gudahiisa macmiilkaasi oo lagu darey qorshaha daryeelka macmiilka ugu yaraan tirada dheefta la wadaago ee la waafajiyey saacadaha lagu muujiyey xogta DSHS, bil iyo sannad ahaan, ee loo adeegsadey in lagu xisaabiyo saamigaaga maaliyadda maslaxada (saacadahan ayaa lagu qorey bogga 9aad ee ogeysiiskan); iyo
3. Laguma siin lacagaha adeegyadaasi.

**Dib-u-qaybin:** Haddii aadan lacageysan ama bankiga ku shuban lacag-bixinta maslaxada, saamigaaga (iyo dulsaar kasta ee ku soo kordhay) waxaa dib loogu qaybin doonnaa Xubnaha Kale ee Dacwadda Maslaxada. Si la mid ah, haddii Xubnaha Kale ee Dacwadda Maslaxada aysan lacageysan jeeggagooda, saamiyadooda waxaa dib loogu qaybin doonnaa xubnaha kale ee dacwadda maslaxada (oo aad adiga ka mid tahay, haddii aadan ka bixin). Waxaa jiri doonna laba dib-u-qaybin. Lacag-bixinno kasta ee aanan la lacageysan ka-dib dib-u-qaybinta labaad waxaa dib loogu celin doonnaa Dowladda gobolka.

**Canshuuraha Mushaaraadka:** Lacag-bixintaada maslaxada waa mushaaraad ay sheeganayaan shaqaale sidaa daraadeed waxaa ku waajiba canshuuraha mushaaraadka iyo dakhliga ee ku habboon. Maamulaha maslaxada ayaa qaddaradaasi lacagta ah ugu wargelin doonna hay'adda IRS foomka W-2.

**Khidmadaha Ururka Shaqaalaha:** Haddii aad hadda tahay xubin ka tirsan SEIU 775, ama aad ahayd xubin ka tirsan markii ugu dambeysay oo aad mushaar ku qaadatey IP ahaan, maamulaka maslaxada ayaa ka jari doonno 3.2% lacag-bixintaada ee bilaha aad ahayd xubinka ka tirsan ururka SEIU 775 wuxuunna lacagtaasi u diri doonnaa ururka shaqaalaha.

**Shuruudaha Maslaxada:** Maslaxadu waxay ugu baahan tahay hay'adda federaalka ee maamusha Medicaid in ay xaqiijiso in ay bixin doonto maaliyadaha federaalka ee waafaqsan dhammaan lacag-bixinnada maslaxada. Waxay xaqiijintaasi bixisay bishii Disembar 2021. Waxay kaloo u baahnayd in Golaha Sharci-dejinta Washington uu si buuxda u maalgeliyo maslaxada. Golaha Sharci-dejinta ayaa sidaa sameeyay bishii Maarso 2022, Guddoomiyaha gobolkana wuxuu miisaaniyadda saxiisay 31-ka Maarso, 2022.

**Ka-bixidyada:** Haddii in ka badan 3% ee xubnaha dacwadda ay go'aasadaan in ay ka baxaan maslaxada, DSHS waxay maslaxada ka dhigi kartaa mid aanan waxba ka jirin.

**14. Waa maxay saameynta ay leedahay ku sii jiridda dacwadda maslaxada?**

Haddii aad iska reebo mooyaane (sida lagu sharxay Qaybta 15aad ee hoose), waxaad ku sii jiri doontaa dacwadda maslaxada. Maxkamaddu waxay joojin doontaa kiiska "iyadoo aan mar kale dacwadiisa loo soo gudbin karin" haddii an maslaxadu ansaxiso. Haddii ay sidaa sameyso, sheegashooyin kasta ee laga yaabo ama lagu sheegtay dacwaddan, oo aad adiga ka mid tahay, si joogto ah ayaa loo joojin doonnaa. Haddii si kale loo dhigo, amarka joojinta ee maxkamadda ayaa ka fasixi doonta oo ka qaadi doonta DSHS sheegashooyinka ujuurrooyinka iyo lacagaha waqtiga dheeraadka ah ee aan la bixin, khasaaraha laba-laabmey ama magdhowga, ujuurrooyinka qareennada, iyo dulsaarka ay sheegteen ama laga yaabo in ay sheegtaan Dacwoodayaasha ama Xubnaha Dacwadda Maslaxada oo ku saleysan xaqiiqooyinka iyo eedaymaha Cabashada inta u dhaxeyso 7-da Maarso, 2014, iyo 28-ka Febraayo, 2021, oo ay ku jiraan laakiinse aanan ku xaddidnayn sheegashooyinka waafaqsan Xeerka Mushaarka Ugu Yar ee gobolka, RCW 49.46, Xeerka Mushaar Celinta, RCW 49.52, iyo waajibaadka iimaanka wanaagsan iyo cadaaladda ee la tacaamulka qandaraasyada u dhaxeeya IPs-yada iyo DSHS. Marka sheegashooyinka "la iska dhaafo" taasi macnaheedu waa in qofka ay khuseyso iska dhaafidda in uusan goor dambe dacwo ku soo oogi karin ama dib uga heli karin Dowladda ama dhinacyada kale ee laga dhaafey (sida DSHS iyo wakiiladooda) wax ka mid ah sheegashooyinka ay iska dhaafiddu khuseyso.

Haddii Maxkamaddu ay ansaxiso maslaxada, DSHS ayaa sidoo kale ka dhaafeysa Dacwoodayaasha iyo Xubnaha Dacwada Maslaxada ee aanan ka bixin dacwadda maslaxada dhammaan sheegashooyinka ee laga yaabo ama lagu sheegtay dacwaddan, oo ay ku jiraan sheegashooyinka jebinta waajibaadyada qandaraaska ee IPs, ficillada qandaraaska ee ka dhanka ah Xubnaha Dacwadda Maslaxada, oo ay ku jiraan ficillada sheegaya in Xubnaha Dacwadda Maslaxada ay shaqeeyeen saacado aan loo oggolaan oo la xiriira xeerarka dheefta la wadaago.

## KA REEBIDDA NAFTAADA MASLAXADA

Haddii aad doonayso in aad yeelato xaqa aad u leedahay in aad DSHS ku dacweyso arrimaha sharciga ee kiiskan, waa in aad naftaada ka reebtaa dacwadda maslaxada. Hannaanka ka-reebidda naftaada waxaa loo yaqaannaa "ka-bixidda" dacwadda maslaxada.

**15. Sideen uga bixi karaa maslaxada?**

Haddii aad doonaysid in aad naftaada ka reebto maslaxada, waa in aad boostada ku soo dirtaa, adiga oo adeegsanaya Boostada Mareykanka ee Heerka Koowaad (First Class United States Mail), fooomka la socda ogeysiiskan

Liang v. State of WA: IP Wage Settlement
c/o JND Legal Administration
PO Box 91373
Seattle, WA 98111

kuna soo qor magacaaga, cinwaankaaga hadda, lambarkaaga telefoonka, iyo cinwaanka iimayl-ka. Si uu u noqdo mid taabogal ah, bayaanka ka soo bixidda waa in la buuxiyaa, la saxiixaa, oo shaabbad rasmi ah lagu dhuftaa kama dambeys 22-ka Luulyo, 2022.

Haddii aad soo gudbiso codsi sax ah oo waqtigiisa dhaca oo loogu talagalay ka-reebitaanka dacwadda maslaxada, xaq uma yeellan doontid in aad hesho dheefo kasta ee waafaqsan heshiiska maslaxada ee la soo jeediyaya, oo kuguma waajibi doonnaan shuruudahooda ama ka dhaafid kasta ee sheegashooyinka ama joojinta haddii heshiiska maslaxada ay Maxkamaddu ansaxiso. Waxaad kaloo awoodi doontaa in aad dacweyso (ama sii wado in aad dacweyso) DSHS mustaqbalka, haddii xaq-sheegashooyinkaaga ay isku soo urureen gudaha sharciga xaddidaadaha ee lagu dabakhi karo. Haddii aad dooneyso in aad naftaada ka reebto si aad u soo gudbiso dacwo gaar ah oo ka dhan ah Eedaysanayaasha, waa in aad sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragalka ah ula hadashaa qareen sababta oo ah xaq-sheegashooyinkaaga waxaa ku waajiba sharciyada xaddidaadaha.

**16. Haddii aan iska reebo, miyaan lacag ka heli karaa maslaxadan?**

Maya. Haddii aad ka baxdo ama aad iska reebto, wax lacag ah kama heli doontid maslaxadan. Waxaa laga yaabaa in aad dacweyso, sii wado in aad dacweyso, ama in aad qayb ka noqoto dacwadda kala duwan ee ka dhanka ah DSHS ee ku saabsan isla sheegashooyinka, ee ku waajiba dhammaan difaacyada ku habboon.

## DIIDISTA MASLAXADA

Waxaad Maxkamadda u sheegi kartaa in aadan oggolayn maslaxada ama qayb ka mid ah.

**17. Sideen ugu sheegi karaa Maxkamadda in aanan jeclayn maslaxada?**

Haddii aad ku sii jirto dacwadda maslaxada, waxaad diidi kartaa maslaxada haddii aadan jeclayn qayb kasta oo ka mid ah. Waxaad bixin kartaa sababaha aad ugu maleynayso in ay tahay Maxkamaddu in aysan ansaxin. Maxkamaddu waxay tixgelin doonnaa aragtiyadaada. Waxaad diidi kartaa adiga oo u soo gudbinaya diidmo qoraal ah Maxkamadda marka ay tahay 22-ka Luulyo, 2022 cinwaankan 2000 Lakeridge Dr. SW, Bldg. 3, Olympia, WA 98502. Waa in aad sidoo kale boostada ugu soo dirtaa nuqullada diidmadaada qoraalka ah Qareenka Dacwoodayaasha iyo qareenka DSHS cinwaannada hoos ku qoran, iyadoo shaabbad rasmi ah lagu dhuftey kama dambeys 22-ka Luulyo, 2022.

Jennifer Robbins
Darin M. Dalmat
Sarah E. Derry
Barnard Iglitzin & Lavitt
18 W. Mercer St., Suite 400
Seattle, WA 98119

William McGinty
Dan Judge
Margaret McLean
Sara L. Wilmot
Attorney General's Office
P.O. Box 40124
Olympia, WA 98504

Diidmadaadu waa in ay ku jiraan magacaaga, cinwaankaaga hadda, lambarka telefoonka, iyo cinwaanka iimayl-ka, iyo sidoo kale sababaha aad u diideyso. Waxaad sidoo kale qof ahaan uga soo muuqan kartaa dhageysiga kama dambeyska ah si aad ugu sharraxdo diidmadaada(diidmooyinkaaga). Dhageysigu wuxuu dhici doonnaa taariikhda iyo waqtiga hoos lagu muujiyey. Waxaad jeebkaaga ka kireysan kartaa qareen kugu metalaya dhageysigan iyo si aad u sameyso diidmada maslaxadan.

Keliya Xubnaha Dacwadda Maslaxadan ee diida maslaxada la soo jeediyay iyadoo loo marayo habraacyadan ayaa rafcaan ka qaadan kara go'aan kasta ee kiiskan. Haddii aadan diidin taariikhda kama dambeysta ah, goor dambe ma diidi kartid.

**18. Waa maxay farqiga u dhaxeeya diidista maslaxada iyo ka reebidda naftaada?**

Diidista waa keliya in aad u sheegto Maxkamadda in aadan jeclayn wax ku saabsan maslaxada. Waxaad keliya diidi kartaa haddii aad ku jirto dacwadda maslaxada. Ka-reebidda naftaada waa u sheegidda Maxkamadda in aadan doonayn in aad qayb ka noqoto dacwadda maslaxada. Haddii aad naftaada ka reebto, ma lihid aasaas aad ku diidi karto sababta oo ah kiiska mar dambe kuma saameyn doonno.

## QAREENNADA KU METALAYO

**19. Qareen ma u haystaa kiiskan?**

Maxkamadda ayaa go'aamisey in qareennada Barnard Iglitzin & Lavitt LLP loo aqoonsadey in metelaan adiga iyo dhammaan Xubnaha Dacwadda Maslaxada. Qareennadan waxaa loo qoondeeyay in ay ka noqdaan "Shirkadda Sharciga" ee dacwaddan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waayo-aragnimada iyo shaqada qareennadan ayaa waxaa laga heli karaa www.workerlaw.com. Laguguma dallaci doonno lacagaha qareennadan. Haddii aad dooneyso in uu ku metelo qareen adiga kuu gaar ah, waxaad jeebkaaga ku kireysan kaartaa mid adiga kuu gaar ah.

**20. Sidee loo bixin doonnaa lacagaha qareennada?**

Shirkadda Sharciga waxay Maxkamadda weyddiisan doonaanin ay ansaxiso lacag-bixin dhan $1,625,000 (1.4% ee maaliyadda maslaxada) oo loogu talagalay in lagu bixiyo ujuurrooyinka qareennadooda iyo kharashka sharciga ah. Haddii la ansaxiyo, qaddarkan waxaa laga bixin doonnaa wadarta guud ee maaliyadda maslaxada. Haddii kharashka shaqada sharciga ka-dib 17-ka Sibtembar, 2021, uu ka badan yahay in Shirkadda Sharciga ay fileysay, waxay Maxkamadda weyddiisan karaan in loo soo celiyo ujuurrooyinka qareenka ee dheeriga ah. DSHS waxay diidi kartaa haddii Shirkadda Sharciga ay codsigaasi soo gudbiso. Maslaxadu weli waa mid dhaqangal ah xitaa haddii Maxkamadda ay diido qaar ama dhamman codsiga Shirkadda Sharciga ee ujuurrooyinka iyo kharashka.

## DHAGEYSIGA CADDAALADA AH EE MAXKAMADDA

**21. Goormee ayaa la qabanayaa dhageysiga caddaaladda ah?**

Marka ay taariikhdu tahay 16-ka Sibtembar, 2022 oo ay saacadduna tahay 9:00 a.m., Maxkamadda Sare ee Degmada Thurston, 2000 Lakeridge Dr. SW, Bldg. 3, Olympia, WA 98502, Maxkamaddu waxay qaban doontaa dhageysi lagu go'aaminayo haddii maslaxada la soo jeediyay ay tahay mid caddaalad ah, dad ku filan, oo macquul ah, waana in la siiyaa oggolaanshaha kama dambeysta ah. Taariikhda iyo waqtiga Dhageysiga Ansaxinta Maslaxada Kama-dambeysta ah ayaa waxaa laga yaabaa in ay isbeddesho ogeysiis dheeraad ah la'aan. Waa in aad kala socotaa mareegtada maslaxada ee ah www.IPWageSettlement.com wax kasta oo ku soo cusboonaada ama ka wac maamulaha maslaxada lambarka bilaashka ah ee 888-964-0102.

**22. Ma tahay in aan imaado dhageysiga caddaaladda?**

Maya, haddii aad maslaxada diidday mooyaane. Haddii aadan ka bixin maslaxada, Shirkadda Sharciga ayaa kugu metel karta dhageysiga. Waxaa lagugu soo dhoweynayaa in aad ku timaado kharashkaaga. Haddii aad diidmo soo dirto, looma baahna in aad Maxkamadda timaado. Haddii aad diidmadaada oo qoraal ah soo dirtey waqtigii loo baahnaa, Maxkamaddu way tixgelin doontaa. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aad soo kireysato qareen adiga kuu gaar ah oo imaan kara, laakiinse looma baahna in diidmadaada la tixgeliyo.

**23. Miyaan ku hadli karaa dhageysiga caddaaladda?**

Haddii aad soo gudbiso diidmo waqtigeeda ku dhaceysa, waxaad Maxkamadda weyddiisan kartaa fasax si aad ugu hadasho dhageysiga caddaaladda. Si aad taasi u sameyso, fadlan ku dar ereyada "waxaan doonayaa in aad ka soo muuqdo dhageysiga caddaaladda/I intend to appear at the fairness hearing" diidmadaada qoraalka ah. Dhaartaada qoraalka ah ayaa lagu xaddidi doonnaa sababaha aad ku dartey diidmadaada. Kama hadli kartid dhageysiga haddii aad iska reebto maslaxada.

## HELIDDA MACLUUMAAD DHEERAAD AH

**24. Ma jiraan faahfaahinno dheeraad ah oo ku saabsan maslaxada?**

Ogeysiiskan wuxuu soo koobayaa maslaxada la soo-jeediyay. Faahfaahinno dheeraad ah ayaa waxay ku qoran yihiin Heshiiska Maslaxada, kaas oo heli karto adiga oo soo wacaya 888-964-0102 ama booqanaya www.IPWageSettlement.com.

**25 Sideen ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?**

Waxaad waci kartaa 888-964-0102; farriin ugu qori kartaa Maamulaha Dacwadda:

Liang v. State of WA: IP Wage Settlement
c/o JND Legal Administration
PO Box 91373
Seattle, WA 98111

ama booqo mareegtada www.IPWageSettlement.com, halkaasi oo aad ka heli karto jawaabaha su'aalaha caamka ah ee ku saabsan maslaxada, foomka ka bixidda, oo lagu darey macluumaad kale oo muhiim ah oo la xiriira maslaxada.

**SAACADAHA WAX LAGA BEDDELAY EE DHEEFTA LA WADAAGO OO KOOBAN EE KU JIRTA XOGTA DSHS**

Saacadaha wax laga beddelay e dheefta la wadaago ee lagu muujiyay xogta DSHS ee sannad iyo bil ahaan ee la adeegsadey si loo xisaabiyo saamigaaga maaliyadda maslaxada waa sidan soo socota:

[FILL IN FROM DATA]

## CODSIGA KA-REEBNAANTA

***Liang, et al. v. Wash. State Dep't of Social and Health Servs., Lr. Kiiska 20-2-02506-34***
**Maxkamadda Sare ee Degmada Thurston**

[Name]
[Address1], [Adress2]
[City], [ST] [Zip]

Telefoonka: [Phone]

**Haddii macluumaadka kor lagu qorey uu isbeddelay ama uu khalad yahay, fadlan cusboonaysii macluumaadkaaga hoose:**

Magaca: ______________________________________________

Cinwaanka boostada: ______________________________________________

Magaca: ______________________________________________

Magaca: ______________________________________________

**Bixi cinwaankaaga email-ka, ama, haddii aadan lahayn cinwaan email-ka, qor 'midna'**

Cinwaanka email-ka: ______________________________________________

Marka aan hoos saxiixo oo aan soo celiyo foomkan, waxaan ka baxayaa maslaxada dheefta la wadaago ee IP.

______________________________ Taariikhda La Saxiixay: ________________________
Saxiixa

Si aad naftaada uga reebto maslaxada dacwadda kiiskan, waa in aad buuxisaa, saxiixdaa, oo boostada ugu soo dirtaa foomkan, isagoo shaabbad rasmi ah lagu soo dhuftey kama dambeys 22-ka Luulyo, 2022 cinwaankan:

Liang v. State of WA: IP Wage Settlement
c/o JND Legal Administration
PO Box 91373
Seattle, WA 98111